

# KU SOO DHAWOOOW WAKHTI FIRAAQO OO QIIMO LEH



Arbaca kasta saacadaha 14.30 ilaa 16.30 waxa Kristin ay joogtaa Grannehjelpa (cinwaan: Sandenvegen 1B, 5600, Norheimsund) waxaanay diyaar u tahay su'aalo iyo wadahadal ku saabsan wakhtiga firaaqada ah iyo caawin ku saabsan sida lacagta looga bixiyo Friskus.



## CARRUURTA IYO DHALLINYARADA KVAM

ee jira 6 sanno ilaa 18 sanno waxa lixdii bilood ba la siinaya 1000 karoон oo ay ku bixin karaan lacagta firfircoonda la sameeyo wakhtiga firaaqada ah ee joogtada ah isla markaana abaabulan. Waxa loola jeedaa firfircoonda ay koox carruur ama dhallinyaro ah isu imanayso ugu yaraan 6 jeer sannadkii, oo isla markaana ay joogaan qof ama dhowr qof oo waaweyni oo ay hogaaminayaan firfircoonda. Kaadhka Firfircoonda Wakhtiga Firaaqada ah (Fritidskortet) waa mid qofka la siiyay u gaar ah, islamarkaana lacagta ku jirta looma wareejin karo cid kale. Waxa Kvam ka jira firfircooni badan oo la kala dooran karo.

Waxaad ka heli kartaa: [kvam.friskus.com](http://kvam.friskus.com)



## HADAFKA AANNU KA LEENAHAY KAADHKA FIRFIRCOONIDA

ayaa ah in dhammaan carruurta iyo dhallinyarada Kvam ay dareemaan in ay jirto meel ay ka tirsan yihiin oo ay ka heli karaan wax ay ku fiican yihiin. Kaadhka Firfircoonda waa mashruuc tijaabo ah oo ka yimi agaasinka arrimaha carruurta, dhallinyarada iyo qoyska waxaanu socnayaa ilaa iyo gu'ga 2022.

## DIYAARSO KAADHKA FIRFIRCOONIDA:

Kaadhka Firfircoonda waa digitaal, waxaanad ka helaysaa [kvam.friskus.com](http://kvam.friskus.com). Waa in aad is diiwaangeliso ka hor intaanad bixinin lacagta. Halkaas waxaad ka helaysaa dhammaan firfircoonda loogu talogalay carruurta iyo dhallinyarada Kvam.

Lacagta firfircoonda ka bixi: [kvam.friskus.com/fritidskortet](http://kvam.friskus.com/fritidskortet) ama iskaangaree QR-ta.

Kaadhka Firfircoonda waxaad u isticmaalaysaa in aad lacagta ku bixiso, laakiin haddii aad rabto inaad firfircooni ka qaybgasho la xidhiidh masuuliyiinta abaabulaya firfircoonda.

Haddii lacagta firfircoonda ee la bixinayo ka badan tahay inta ku jirta kaadhka firfircoonda, waa in aad iska bixiso lacagta dheeraadka ah. Haddii aanad awoodin bixinta lacagta dheeraadka ah, waxaad la xidhiidhaa Kristin Lundblad oo ka masuul ah nidaamka Fritidskortet Plus (Kaadhka Firfircoonda ee la kordhiyay). Barta [kvam.no/fritidskortet](http://kvam.no/fritidskortet) waxaad ka akhrisan kartaa faahfaahin ku saabsan nidaamka iyo habka aad u isticmaali karto Kaadhka Firfircoonda.

Iskaangaree halkan  
oo qaado Kaadhka  
Firfircoonda!



 friskus

Kvam herad

Haddii aad rabto la soo xidhiidh Masuulka mashruuca:  
Kristin Lundblad • Tel: 900 58 018 • [krisve@kvam.kommune.no](mailto:krisve@kvam.kommune.no)